Dual Language Designation Webinar Q&A

Tababarka

Waa maxay tababarka khasabka ah ee aan u baahanahay inaan qaato, xaggeese ayaan ka heli karaa?

Dhammaan **macallimiinta hoggaamiya barnaamijyada laba-luuqadoodka** ah iyo **hoggaamiyeyaasha barnaamijka** waa inay dhammaystiraan **Tababarka Dual Language ee DCYF**. Tababarku waa inuu ku diiwaangashan yahay diiwaankaaga xirfadeed ee **MERIT** ka hor inta aadan dhammaystirin heerkaaga aqoonsiga tayada, maadaama uu yahay shuruud u-qalmitaan. Waxaa jira laba koorso oo tababar ah:

- **Dual Language Learners: Training for Early Learning Professionals**
- **Dual Language Learning in Early Care and Education**

Waxaad geli kartaa akoonkaaga **MERIT** oo waxaad ka raadin kartaa tababarradan qaybta **"FIND TRAINING."**

Nooc iskiis loo qaadan karo (asynchronous) ayaa dhawaan laga heli doonaa bogga tababarka ee DCYF. Fadlan la soco wixii cusboonaysiin ah ee ku saabsan sida loo heli karo dhammaan fursadaha tababarka ee Dual Language.

Tababarradan ma laga bixiyaa kulliyadaha deegaanka?

Maya. Tababarka Dual Language ee DCYF lagama bixiyo kulliyadaha deegaanka. Waqtigan xaadirka ah, tababarradan waxaa lagu bixiyaa oo keliya hay'adaha ay DCYF qandaraaska la leedahay.

Jadwalka Waqtiga

Maxaa dhacaya haddii aan ku dhowahay inaan dhammaystiro wareeggayga laakiin aan weli soo gudbinayo qaybaha loo baahan yahay? Ma u baahanahay inaan codsado dib-u-eegis degdeg ah si wareeggaygu uusan si toos ah u dhammaystirmin?

Haddii aad haysato qayb dib-u-eegis ku jirta, sida Video Highlight, ma awoodi doontid inaad dhammaystirto wareeggaaga inta dib-u-eegistu socoto. Marka dib-u-eegistu dhammaato oo aad hesho jawaab-celintaada, wareeggaagu si toos ah ayuu u dhammaystirmi doonaa. Xusuusnow inaad ka arki karto dhibcahaaga la saadaaliyay MERIT. Waa inaad haysataa dhibco ku filan si aad u gaarto heerka tayada 3 ama ka sarreeya si aad u hesho Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah

Waxaan ku jiraa bartamaha wareeggayga hadda ee aqoonsiga tayada. Ma heli karaa aqoonsigan sannadkan inta lagu jiro wareeggayga hadda?

Haddii goobtaadu ay hore u dhammaystirtay Video isla markaana ay weli awooddo inay soo gudbiso hal muuqaal oo ku baxa luuqadda lammaanaha ah, waxaad awoodi doontaa inaad dhammaystirto shuruudda looga baahan yahay helitaanka aqoonsiga.

Maalgelinta Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah

Waa maxay shuruudaha u-qalmitaanka ee lagu heli karo maalgelinta Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah?

Barnaamijku waa inuu ka mid yahay mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Bixiye ruqsad haysta, shahaadaysan, ama loo shahaadeeyay lacag-bixin keliya oo u adeega carruurta hela kaalmada daryeelka carruurta (waa inuu helay ugu yaraan hal lacag-bixin oo kaalmada daryeelka carruurta ah 12-kii bilood ee la soo dhaafay); ama
- Barnaamijka ECEAP.

Barnaamijku waa inuu sidoo kale:

- Helaa Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah.
- Gaaraa heer tayo oo ah 3 ama ka sarreeya ee Early Achievers.

Haddii aan hore u helay maalgelinta Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah, ma u qalmaa inaan mar kale helo?

Haa. Waxaad u qalmi kartaa inaad hesho maalgelintan wareeg kasta oo aqoonsiga tayada ah oo aad ku hesho Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah. Laga bilaabo Luulyo 1, 2026, barnaamijka waxaa loo soo diri doonaa ogeysiis haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka ee lagu heli karo maalgelinta.

Waa imisa qadarka maalgelinta Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah laga bilaabo Luulyo 1?

Waxaa isbeddelay habka maalgelinta. Halkii hore maalgelinta loogu bixin jiray fasal kasta, hadda waxaa **lagu bixin doonaa goob kasta (site)**.

- Ilaa $2,100 **goob kasta oo** Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah.
- Ilaa $2,500 **goob kasta oo** Barnaamijyada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabiillada.

Sidee loo isticmaali karaa maalgelinta Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah?

Maalgelinta waa in loo isticmaalaa taageeridda waxbarashada carruurta ku hadla luuqado badan. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Mushaharka shaqaalaha laba-luuqadoodka ku hadla.
- Tababarro iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha.
- Waqti mushahar leh oo loogu talagalay qorsheynta ama bixinta shaqaale beddel ah.
- Manhaj ku habboon dhaqanka iyo luuqadaha ay carruurtu ku hadlaan.

- Agabka fasalka iyo kheyraadka waxbarashada.

Anigoo ah bixiye cusub, maxaan kale oo u baahanahay inaan sameeyo si aan ugu codsado maalgelintan?

Haddii aad tahay bixiye cusub oo hadda helay ruqsad, waa inaad iska diiwaangelisaa Early Achievers. Tani waxay kuu oggolaanaysaa inaad hesho tababare (Early Achievers Coach) iyo xiriiriye bulsho (Community Liaison). Waxaad la shaqayn doontaa tababarahaaga iyo xiriiriyahaaga si ay kuu taageeraan inta lagu jiro wareeggaaga aqoonsiga tayada.

Markaad qorshaynayso sida tani uga hirgeli doonto barnaamijkaaga, waxaad bilaabi doontaa diyaarinta Program Handbook-kaaga, oo ay ku jirto siyaasadda barnaamijka ee waxbarashada carruurta ku hadla luuqado badan. Ka fiirso hawlaha iyo waxqabadyada aad ku bixiso luuqadda lammaanaha ah. Waxaan sii wadi doonnaa cusboonaysiinta boggayaga internetka iyo qoraalladayada si aan u bixinno tilmaamo dheeraad ah, sidaa darteed fadlan la soco wixii warar iyo cusboonaysiin ah.

Shuruudaha U-qalmitaanka

Fasal kasta ma inuu soo gudbiyaa ugu yaraan hal muuqaal oo ku baxa luuqadda lammaanaha ah?

Haa. Dhammaan fasallada Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah ee ka qaybqaata barnaamijka waa inay soo gudbiyaan hal Video Highlight oo ku baxa Ingiriisi iyo hal Video Highlight oo ku baxa luuqadda lammaanaha ah ee lagu isticmaalo fasalkaas.

Haddii barnaamijkaygu uu soo gudbiyay Video Highlights oo ku baxay wax ka badan hal luuqad intii lagu jiray wareeggaygii ugu dambeeyay ee aqoonsiga tayada, ma u baahanahay inaan mar kale soo gudbiyo?

Haa. Maadaama shuruuddani ay dhaqan galayso Luulyo 1, 2026, Video Highlights-kii aad soo gudbisay wareeggii hore ee aqoonsiga tayada looma tixgelin doono shuruuddan.
Laga bilaabo markaas, dhammaan fasallada Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah waa inay soo gudbiyaan laba Video Highlights: hal muuqaal oo ku baxa Ingiriisi iyo hal muuqaal oo ku baxa luuqadda lammaanaha ah.

Yaa u qalma ka qaybgalka Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah?

Barnaamijkan waxaa loogu talagalay **dhammaan** ka qaybgalayaasha Early Achievers ee bixiya waxbarasho carruurta ku hadla luuqado badan.

Haddii barnaamijkaygu bixiyo wax ka badan laba luuqadood, ma waxaan u baahanahay inaan soo gudbiyo muuqaal luuqad kasta ah? Ma jiraa xad u yaalla tirada luuqadaha?

Maya. Ma jiro xad ku saabsan tirada luuqadaha uu barnaamijku bixin karo. Waxa keliya oo lagaaga baahan yahay inaad soo gudbiso hal Video Highlight oo ku baxa hal ka mid ah luuqadaha lammaanaha ah.

Intee in le'eg ayay tahay in luuqadda lammaanaha ah laga maqlo muuqaalka 10-ka daqiiqo ah?

Video Highlight-ka ku baxa luuqadda lammaanaha ah waa inuu inta badan ku baxaa luuqaddaas. Haddii carruurtu ku hadlaan luuqad kale inta muuqaalku socdo, taasi waxay fursad u tahay macallinka inuu ku dhiirrigeliyo ama dib ugu hago carruurta inay isticmaalaan luuqadda lammaanaha ah inta lagu jiro hawshaas.

Markaan codsado Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah, ma meesha ayuu ka saarayaa aqoonsiga kale ee aan hore u lahaa? Ma tani waa shuruud cusub marka loo eego sidii hore?

Laga bilaabo Luulyo 1, 2026, marka barnaamijku helo Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah, aqoonsigaasi wuxuu sii jiri doonaa saddex sano. Barnaamijyadu waxay cusboonaysiin doonaan aqoonsigooda mar kasta oo ay bilaabaan wareeg cusub oo Early Achievers ah, iyagoo dhammaystiraya tallaabooyinka cusboonaysiinta isla markaana soo gudbinaya caddeymaha hadda jira.

Haddii aanan weli soo gudbin lixda Video Highlights, ma samayn karaa oo ma soo gudbin karaa muuqaal kale oo ku baxa luuqad kale?

Haa, haddii aad weli ku jirto wareeggaaga aqoonsiga tayada. Video Highlight-kan lixaad waxaa loo tirin doonaa mid ka mid ah Video Highlights-ka looga baahan yahay si loo gaaro Heerka Tayada 3 ama ka sarreeya.

Maxaa looga baahan yahay inuu ku jiro Video Highlight-ka?

Muuqaalku waa inuu muujiyaa:

- Carruurta iyo macallinka oo si wadajir ah ugu hawlan isticmaalka luuqadda lammaanaha ah. Muuqaalku waa inuu ku jiraa ugu yaraan hal ilmo oo aan qaraabo la ahayn.
- Muuqaalku waa inuu ahaadaa 10 ilaa 15 daqiiqo oo uu muujiyo is-dhexgal macno leh oo u dhexeeya shaqaalaha iyo carruurta.

Waa maxay shuruudaha shaqaalaha ee loo baahan yahay si loo helo Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah?

- **Hal macallin hoggaamiye oo laba-luuqadood ku hadla**, wuxuu soo gudbiyaa **laba** muuqaal (mid ku baxa Ingiriisi iyo mid ku baxa luuqadda lammaanaha ah) AMA

- **Laba macallin oo hal luuqad ku kala dhiga** (Macallin Hoggaamiye iyo Macallin Kaaliye):
    - Marka la isticmaalo habkan shaqaalaynta, macallin kasta wuxuu soo gudbiyaa muuqaal ku baxa luuqadda uu wax ku dhigo.ku baxa luuqadda uu wax ku dhigo.
    - Macallinka kaaliyaha ahi wuxuu soo gudbin karaa **hal** muuqaal oo keliya, iyadoo ku saleysan luuqadda uu wax ku dhigo.

Marka ay timaado baridda carruurta luuqadda lammaanaha ah, ma waxaa looga baahan yahay inay bartaan akhriska iyo qorista, mise ku hadalka luuqadda oo keliya ayaa ku filan?

Haa. Waxaa laga rabaa carruurta inay bartaan akhriska iyo qorista barnaamijyada laba-luuqadoodka ah. Habkan waxbarasho wuxuu taageeraa **barashada laba luuqadood (bilingualism)**, akhriska iyo qorista **labada luuqadood (biliteracy),** iyo xoojinta **xiriirka dhaqanka iyo qoyska.**

Haddii barnaamijkayga daryeelka carruurtu uu leeyahay carruur ku hadla luuqado badan oo kala duwan, ma khasab baa inaan si fiican ugu hadlo dhammaan luuqadahaas?

Maya. Macallinka hoggaamiyuhu khasab ma aha inuu si fiican ugu hadlo dhammaan luuqadaha. Haddii barnaamijkaagu leeyahay laba macallin (Macallin Hoggaamiye iyo Macallin Kaaliye), waxay si wadajir ah u soo gudbin karaan Video Highlights.

Haddii carruurta ku jirta barnaamijkayga ay dhammaantood yihiin carruur si gaar ah lacag looga bixiyo (private pay), ma ka qayb geli karaa Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah?

Haa. Maadaama Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah uu qayb ka yahay Early Achievers, wuxuu u furan yahay dhammaan ka qaybgalayaasha Early Achievers. Barnaamijyada doorta inay ka qaybqaataan waa inay buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka oo ay dhammaystiraan dhammaan tallaabooyinka looga baahan yahay si ay ugu qalmaan Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah.

Su'aalaha Guud

Ma khasab baa inaan dooranno hal luuqad lammaane ah?

Haa. Waa inaad doorataa hal luuqad lammaane ah, xitaa haddii aad wax ku dhigto luuqado kale oo badan marka laga reebo Ingiriisiga.

Waxaan leenahay barnaamij loogu talagalay carruurta da'da dugsiga, mid ka mid ah muuqaalladana wuxuu noqon doonaa mid ay carruurtaas ku jiraan. Muuqaalkaas ma loo isticmaali karaa labadaba Dual Language iyo barnaamijka carruurta da'da dugsiga?

Maya. Barnaamijyada carruurta da'da dugsiga uma qalmaan Early Achievers. Muuqaalladu waa inay muujiyaan carruur da'doodu u dhaxayso dhalashada ilaa 5 sano jir.

Carruurta da'da dugsiga ma lagu xisaabinayaa goobaha Family Child Care?

Barnaamijyada loogu talagalay **oo keliya** carruurta da'da dugsiga kama qayb geli karaan Early Achievers. Si kastaba ha ahaatee, barnaamijyo badan oo Family Child Care ah waxay u adeegaan carruur da'yo kala duwan leh. Fadlan la xiriir DCYF si aan kuu siino macluumaad ku habboon barnaamijkaaga.

Manhaj noocee ah oo laba-luuqadood ah ayay Early Achievers aqbashaa?

Waqtigan xaadirka ah, ma hayno liis gaar ah oo manhajyo ah oo loogu talagalay barnaamijyada carruurta ku hadla luuqado badan. Waxaad buuxin kartaa Curriculum Assessment Tool si aad u muujiso in manhajkaagu waafaqsan yahay heerarka manhajka.

Ma u aqoonsan karaa barnaamijkayga inuu yahay barnaamij laba-luuqadood ah haddii carruurtu aysan luuqaddaas ku hadlin guriga?

Haa. Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad doorato luuqad ka tarjumaysa qoysaska aad u adeegto, inkasta oo aysan khasab ahayn inay noqoto luuqadda carruurtu ku hadlaan guriga. Tusaale ahaan, haddii aad wax ku dhigto luuqad aan guriga lagaga hadlin, sida Fiitnaamiis, waxaad weli si joogto ah fasalka ula wadaagaysaa carruurta luuqaddaada iyo dhaqankaaga.

Xaggee ayaan CECI ka heli karaa ikhtiyaarka ka qaybgalka Aqoonsiga Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah?

Laga bilaabo Luulyo 1, 2026, waxaad ka heli doontaa qoraalka la cusboonaysiiyay ee attestation gudaha Program Profile.

Haddii aan hore u soo gudbiyay lix muuqaal, ma tirtiri karaa mid si aan ugu beddelo muuqaal cusub oo ku baxa luuqadda lammaanaha ah?

Maya. Haddii aad hore u dhammaystirtay lixda muuqaal ee wareeggaaga hadda, nidaamku kuuma oggolaanayo inaad tirtirto muuqaal si aad u soo gudbiso mid cusub.

Yaan la xiriiraa haddii aan su'aalo qabo?

Fadlan su'aalahaaga email ugu dir QRIS@dcyf.wa.gov.